

KINDERGARTEN CARRUURTU WAXAY JECESHAHAY INAY WAX KU BARTAAN

Waxaa maxay kindergarten?

Kindergarten waa barnaamij waxbarasho oo carruurta ka hor inta aanay bilaabin waxbarashada.

Barnaamija Kindergarten-ka waxaa wax bara carruurta macalimiin haysta shahaado.

Kindergarten-ka ilmahaagu wuxuu yeelan doonaa xirfado muhiima si loogu diyaariyo dugsiga.

Maxaa kindergarten-ku muhiim ugu yahay ilmahayga?

Carruurta aada kindergarten-ka waxay yeeshaan xirfado kuwaas oo ah asaaska dhamaan waxbarashada mustaqbilka, sida akhrinta, barashada tirinta iyo aqoonsiga nambarada iyo sida loo xaliyo dhibta.

Ilmahaagu wuxuu ku baran doonaa cayaar, taas oo cilmi baaristu muujisay inay tahay sida ugu fiican oo wax lagu bari karo ilmaha yar.

Kindergarten-ka ilmahaagu wuxuu samaysan doonaa saaxiibo wuxuuna yeellan doonaa kalsooni iyo madax banaani.

Yaa bixiya barnaamijyada kindergartenka?

Barnaamijyada Kindergarten-ka waxaa laga hellaa maalinta inteeda badan xarumaha daryeelka iyo weliba adeegyada kindergarten-ka ee standalone-ka.

Sidee u doortaa ilmahayga kindergarten-ka ugu fiican?

Waa fiican tahay inaad baarto haddii adeegaa la bixiyo ay kharashkiisa bixiso dawladu – eeg ama baar Kindergartenka Kharashkiisa la bixiy (Funded Kindergarten) iyo shahaadada lagu muujiyey adeega.

Dawladu waxay qiimaysaa tayada dhamaan kindergartenada iyo adeegyada maalinta oo dhan ah kaas oo hoos tegaya nadaamka loogu yeero Qaabka-guud ee Tayada Qaranka (National Quality Framework) waxayna siyyaan adeeg walba qiimayntooda, ama waxay kuu sheegayaan qiimaynta ay hellaan.

Sida ugu fiican oo lagu xaqijiyo adeegu inuu ku haboon yahay qoyskaaga waa in la booqdo adeega daryeelka ama kindergarten-ka, ay eegaan agagaarka lana hadlaan macalimiinta si ay u fahmaan waxa barnaamija Kindergartenku uu siin karo ilmahaaga.

Maxaa dhacaya haddii aan ilmahaygu weli ka hadli karin Ingiriiska?

Macalimiinta Kindergarten-ka ayaa ku dara carruurta oo dhan barnaamija, sidaas darteed carruurta aan ku hadlin Ingiriiska waxay yeellan doonaan fursadaha lagula cayaaro laguna barto carruurta kale.

Kindergartenada qaarkood ayaa iyagana laga yaabaa inay ku hadlaan laba luqadood kuwaas oo siin kara caawima siyaada ah carruurta ama Ingriis xadadan ku hadla ama aanba ku hadlin.

Qiimaha kindergarten-ku waa immisa?

Xukuumadu waxay ku bixisaa dhamaan carruurtu inay tagaan 15 saacadood asbuucii sanada dugsiga ka horraysa. Adeegyada badankood waxay dadka qaadaan lacag marka taas oo wehelisa lacagta dawladu ku bixiso.

Qoysaska qaarkood ayaa laga yaabaa inay awoodaan inay hellan kabitaan si looga caawimo qiiimaha lacagta siyaadada ah, tusaale ahaan qoysaska haysta kaarka daryeelka caafimaadka ama fiisooyinka aadamiga. La hadal adeega kindergarten-ka macluumaad intaas ka badan.

Sidee ugu qoraa ilmahayga kindergarten-ka?

Haddii aad ogtahay adeega kindergarten-ka aad jeelaan lahayd in ilmahaagu aado waad la xiriiri kartaa si aad ugu qorto. Golayaal badan oo agagaaraha ah ayaa leh Mashruuca Iskuqorista Xarunta Dhexe ee Kindergarten-ka sidaas darteed waxaad la xiriiri kartaa Golaha Degmada si loogu qoro kindergarten-ka agagaarahaaga ama weydii kalkaalisaada caafimaadka ilmaha iyo hooyada.

Kindergartenada badankood waxay ku qoraan carruurta sanadka bartankiisa sanadka soo socda. Kindergartenada badankood ayaa leh liiska sugitaanka sidaas darteed waa fikrad fiican in lagu qoro ilmaha sida ugu dhaqsaha badan si loo hello fursada ugu fiican oo helitaanka booska aad doorbideyso.

WAX BADAN KA OGOW

Websaytyada

Hel talada lagu helo kindergarten-ka ugu fiican qoyskaaga: Hel talo si aad u hesho kindergartenka ugu fiican qoyskaaga:

www.education.vic.gov.au/parents/childcare-kindergarten/Pages/default.aspx

Ka baar kindergarten-ka agagaarahaaga ah:

www.education.vic.gov.au/findaservice/Home.aspx

Telefoonka

Fiktooriya Waqooyigeeda Bari	(North eastern Victoria)	1300 333 231
Fiktooriya Waqooyigeeda Galbeed	(North western Victoria)	1300 338 691
Fiktooriya Koonfurteeda Bari	(South eastern Victoria)	1300 338 738
Fiktooriya Koonfurteeda Galbeed	(South western Victoria)	1300 333 232

Si aad u hesho caawimada luqada:

- Wac Adeega Qaranka ee Tarjumaada qoraalka iyo Afcelinta (TIS) oo ah 131 450
- Weydii nambarka agagaarkaaga (kor arag)

Khadka telefoonka ayay ku jiri doonaan waana tarjumayaan.